DEPARTMENT OF CHILDREN, YOUTH, AND FAMILIES

Hordhaca Carruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba Hagaha Ka qaybgalayaasha

Wadar ahaan waa 8 saacadood oo ka kooban 2 kulan oo min 2 saacadood ah ama 4 kalfadhi oo min 2 saacadood ah

Janaayo 2026

Dhamaan agabka lagu sameeyay maalgelinta Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta waxaa xuquuqdooda leh oo lagu ilaaliyay Pub. L. No. 94-553, 90 Stat. 2541.

Xuquuqaha daabacaadda iyo Xaddidaadaha Isticmaalka iyo Mas'uuliyadda

Dhamaan manhajyada ay samaysay Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota, Adeegyada Daryeelka Carruurta, waxaa lagu sameeyay maalgelin dadweyne. Xuquuqda daabacaadda waa la ilaaliyaa, sidaas darteedna lama soo saari karo, lama beddeli karo, lama koobiyeyn karo, lama iibin karo, ama si kale looma qaybin karo iyada oo aan la helin **ogolaansho qoraal** ah oo ka timid Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota. Haddii ay adeegsadaan hay'ado kale oo tababar bixiya, *Waaxda Caruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska iyo Adeegyada Daryeelka Caruurta* waa in lagu tilmaamaa inay tahay milkiilaha manhajka. Waaxda Carruurta, Dhalinyarada, iyo Qoysaska ee Minnesota ma bixiso wax dammaanad ah mana aqbasho wax mas'uuliyad ah oo ku aaddan isticmaalkeeda ama natiijooyinkeeda.

Si aad u codsato oggolaansho qoraal ah oo ku saabsan isticmaalka ama dib usoo saarista qayb kamid ah manhajkaan, iimayl u dir:
DCYF.Child.Care@state.mn.us

Qiimeynta Tababarka

Maalmo yar kaddib marka aad dhammaystirto kooraskan waxaad iimayl ka heli doontaa Develop kaas oo ku weydiinaya inaad buuxiso qiimeynta tababarka ee khadka tooska ah ee dhacdadan oo la yiraahdo Training and Trainer Evaluation Tool (TTET). Runtii waan kaaga mahadcelineynaa taladaada ku saabsan waxqabadka tababaraha, macluumaadka ku jira iyo jawiga tababarka si aan u sameyno horumar inta aan ku guda jirno. Waxaan isticmaalnaa jawaab celintaada marka aan dib u eegno koorsooyinka oo aan jadwal u sameyno bandhigyada tababarka.

Guudmarka Qaybta 1

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (Knowledge and Competency Framework, KCF) ee Minnesota ee qeybaha Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (Child Development Associate, CDA)

Knowledge and Competency Framework for Early Childhood Professionals ee Minnesota iyo Qaybaha Maadada Child Development Associate (CDA) ayaa halkan lagu taxay si ay uga caawiyaan ka-qaybgalayaasha inay fahmaan xirfadaha, macluumaadka, iyo qaybaha maadada ee tababarku ka hadlayo.

- Aagga Mawduuca KCF: I. Korriinka iyo Waxbarashada Caruurta
- Aagga Mawduuca KCF: IV a. Qiimeyn, Maxsuul-ka-gaarid iyo Gaaryeelid

Sharaxaada Kooraska

Xaaladaha naafonimada kala duwan iyo baahiyaha gaarka ah ayaa sii kordhaya waxaana bixiyeyaasha daryeelkacarruurta intooda badan ay heli doonaan fursad ay ku daryeelaan carruurta baahiyaha gaarka ah qaba. Kooraskani wuxuu eegi doonaa qaar ka mid ah astaamaha muujinaya welwelka korriinka oo ay ku jiraan dabeecadaha adag iyo qaar ka mid ah cudur-sheegista ugu badan ee la arko. Koorasku wuxuu sidoo kale dib u eegi doonaa nidaamka gudbinta ee baaritaanka iyo khayraadka wax-qabadka hore (EI).

Ujeedooyinka Waxbarashada

Inta tababarkan socdo, ka qaybgalayaashu waxay:

1. Sharax istiraatiijiyadaha carruurta naafada ah si loo kordhiyo awoodda bulshada iyo shucuureed.
2. Aqoonso dhinacyada lala soconayo iyo baahiyaha soo ifbaxaya ee korriinka carruurta.
3. Sharax muhiimadda ay leedahay Kormeerka ee goobaha Daryeelka Caruurnimada hore.

Dulmarka Kulanka 1 aad

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Ujeedada Waxbarashada oo la gaaray
A	30 daqiiqo	Soodhaweyn iyo Horudhac Dulmarka Shaqada U Dambaysa		
B	30 daqiiqo	Sharax muhiimadda ay leedahay Kormeerka ee goobaha Daryeelka Caruurnimada hore.	Dooda Kooxda Ballaaran Muuqaalka	1
C	30 daqiiqo	Aqoonso Hab-dhaqanka carruurta iyo waxa ay ka dhigan tahay	Dooda Kooxda Ballaaran Hawsha Koox Yar	1
D	30 daqiiqo	Aqoonso astaamaha welwelka leh ee korriinka ilmaha	Dooda Kooxda Ballaaran Lammaanin iyo Wax wadaagis	2
	Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood			

Dulmarka Kulanka 2aad

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Ujeedada Waxbarashada oo la gaaray
A	30 daqiiqo	Sharax muhiimadda ay leeyihiin heerarka korriinka	Dooda Kooxda Ballaaran Muuqaalka	2
B	30 daqiiqo	Sharax istiraatiijiyadaha carruurta naafada ah si loo kordhiyo awoodda bulshada iyo shucuureed	Dooda Kooxda Ballaaran Lammaanin iyo Wax wadaagis	3

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Ujeedada Waxbarashada oo la gaaray
C	45 daqiiqo	Qor siyaabaha loo abuuro barnaamij loo dhan yahay	Hal Abuurka Kooxda Balaaran Hawsha Koox Yar	3
D	15 daqiiqo	Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka	Milicsiga shakhsi ahaaneed	1-3
	Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood			

Mawduucyada la muujinayo

Eray bixinta, Shaqada U Dambaysa, Kormeerka, Hab-dhaqanka iyo Isgaarsiinta, Heerarka Korriinka, Astaamaha Welwelka leh, Isdhexgalka

Dhaqan-gelinta Dhabta ah

Liiska Eray-bixinta

Cilada feejignaan-la'aanta/firfircoonida xad-dhaafka ah ama ADHD - waa xanuun raaga, sidaas darteedna carruurtu waxay la kulmi karaan caqabado joogto ah oo ay ku jiraan inaysan waxba diiradda saari karin, ficil-kadhac, iyo dhaqdhaqaaq xad-dhaaf ah.

Isdhexgalka Dhallaanka Hore - Isdhexgalka carruurnimada hore wuxuu ka kooban yahay qiyamka, xeerarka, iyo hab-dhaqannada taageeraya xaqa ilmo kasta oo yar iyo qoyskiisa, iyada oo aan loo eegin awooddooda, si ay uga qaybgalaan hawlo kala duwan iyo xaalado ahaan xubno buuxa oo ka tirsan qoysaska, bulshooyinka, iyo bulshada weyn. Natiijooyinka la rabo in laga helo waayo-aragnimada loo dhan yahay ee carruurta naafada ah iyo kuwa aan naafada ahayn iyo qoysaskooda waxaa ka mid ah dareenka ka mid noqoshada iyo xubinnimada, cilaaqaadka bulshada ee togan iyo saaxiibtinimada, iyo korriinka iyo waxbarashada si ay u gaaraan awooddooda oo buuxda. Astaamaha qeexaya isdhexgalka ee loo isticmaali karo in lagu ogaado barnaamijyada iyo adeegyada carruurnimada hore ee tayada sare leh ayaa ah helitaanka, ka qaybgalka, iyo taageerada. (DEDC/NAEYC).

Heerarka Korriinka ee Centers for Disease Control and Prevention – diiwaanka xirfadaha carruurtu gaaraan iyagoo u maraya ciyaar, waxbarasho, hadal, ficil iyo dhaqdhaqaaq.

Wax-qabadka Hore (EI) – waa nidaam taageero oo loogu talagalay in carruurta qabta naafonimada korriinka ay ku gaaraan awooddooda buuxda.

Individual Child Care Program Plan (ICCPP) – waa qorshe lagu sharxayo korriinka carruurta iyo sida xirfadlayaasha carruurnimada hore ay u fulin doonaan istiraatiijiyado iyo taageerooyin si loo daboolo baahiyaha korriinka caafimaadka qaba ee carruurta.

Minnesota Early Childhood Indicators of Progress (ECIPS) – waa aalad ay xirfadlayaasha carruurnimada hore u isticmaalaan qorsheynta manhajka, tilmaamaha iyo qiimeynta oo ku salaysan heerarka korriinka.

Barnaamij Ku Habboon Dareemayaasha – waa barnaamij xushmeeya oo tixgeliya baahiyaha dareemeed ee ilmo kasta, sida, yareynta buuqa iyo iftiinka hooseeya.

Sheekooyinka Bulshada – waa in la baro tilmaamaha bulshada, dabeecadaha la filayo, iyo sida loola tacaalo xaaladaha cusub ama isbeddellada qaab cad oo dhab ah.

Is-weydaarsiga Bulshada - waa awoodda in laga qaybgalo isdhexgalka bulshada, oo ay ku jiraan is-weydaarsiga, iyo in lala macaamilo laba qof ama in ka badan.

Hab ku salaysan awoodaha – shakhsi kasta wuxuu leeyahay kala duwanaansho ka dhigaysa mid gaar ah. Dadka qaar ayaa leh xirfado gaar ah oo laga yaabo in kuwa kale aysan awoodin inay ku biiriyaan.

Dhaqan-gelinta Dhabta ah

Daraasad Xaaladeed: Xaaladda Soo Ifbaxaysa

Koox kasta waxaa loo xilsaari doonaa hal dhacdo si ay u aqoonsadaan dhinacyada lala soconayo iyo baahiyaha soo ifbaxaya ee korriinka carruurta. Akhri dhacdada oo ka jawaab su'aalaha ku jira shaxanka.

Kormeerka iyo Xaaladaha Baahiyaha Soo Ifbaxaya

Dhacdada 1. Gabar 3 jir ah ayaa ku qoran fasalka xanaanada. Waxay ku dhibtoonaysaa xilliga goobaabta lagu fariisto halkaas oo ay inta badan dhulka dhabarka u jiifato, kala baxdo, ama ku fariisato carruurta kale. Marka ay dhex socoto marinka xilliyada isbeddelka (kala guurka), waxay u janjeertaa inay ka baxdo safka oo ay gidaarada ku dhacdo. Waxay ka fogaataa hawlaha la weydiiyo inay miiska fariisato oo ay wax ku sawirto qalin-midabeedka, laakiin waxay jeceshahay inay miiska la fariisato midabbada faraha, cajiinka lagu ciyaaro iyo hawl kasta oo wasakh ah. Waxay leedahay gabdho kooban oo ay doorbidayso inay la ciyaarto, si kastaba ha ahaatee, mid ka mid ah gabdhaha ayaa inta badan qaniinta ama xagta xilliga ay ciyaarayaan ama marka ay is-dhaafayaan.

Dhacdada 2. Wiil saddex jir ah oo ah ilmo keliya ah ayaa u muuqda inuu la kulmayo caqabado xagga bilaabida ciyaarta uu la yeelanayo asxaabtiisa. Wuxuu u janjeeraa inuu isku dayo inuu

galo ciyaarta isagoo duminaya dhismaha qoryaha asxaabtiisa, la wareegaya alaabta lagu ciyaaro ama si fudud "isugu dhex tuuraya" xaaladda ciyaarta. Si lama filaan ah ayuu u garaacaa, u haraatiyaa, ugana qaniinaa carruurta daryeelkataas oo keentay in carruurta kale ay isaga fogaadaan ama ay doortaan inaysan la ciyaarin isaga. Wuxuu u muuqdaa inuu iska dhegatirayo awaamiirta afka ah ee ay siiyaan macallimiintu beddelkeedana wuxuu sameeyaa waxa uu isagu doorbidayo inuu kooxda dhexdeeda ka sameeyo intii uu samayn lahaa waxa laga codsaday.

Dhacdada 3. Gabar afar jir ah ayaa dhowaan bilowday inay aaddo daryeelkalaakiin ma laha wax saaxiib ah iskuulka xitaa iskuma daydo inay saaxiibo yeelato ama la hadasho carruurta kale. Si fiican ayay guriga ula ciyaartaa walaalkeed iyo walaasheed ka yar, laakiin marka ay timaado carruurta kale, iskuma daydo inay saaxiib la noqoto.

Dhacdada 4. Wiil 9 bilood jir ah ayaa daryeelkacarruurta ku jiray muddo 3 bilood ah laakiin wuxuu weli doorbidayaa in la xambaaro mar kasta. Wuu ooyaa marka dhulka la fariisiyo. Si madax bannaan ayuu u fariisan karaa laakiin weli ma gurguuranayo. Inta badan wuu diidaa cuntada xilliyada quudinta, isagoo bushimaha isku adkeynaya si aanay qaadadu u gelin. Marka cuntadu saaran tahay saxanka kursigiisa dheer, badanaa wuu ku ciyaaraa uun.

Khayraadka:

- Waa maxay Dabeecaddu?

Waa maxay dabeecaddu?	
Muxuu ilmuhu isku dayayaa inuu ku gudbiyo dabeecaddooda?	
Maxaan samayn karaa si aan uga hortago Hab-dhaqankan?	
Waa maxay xirfadaha cusub ee aan bari karo?	

Dhaqan-gelinta Dhabta ah

Daraasad Xaaladeed: Hlee, oo 1 jir ah, ayaa daryeel ku helaysa guri xanaano qoys oo ay la joogaan 2 carruur ah oo kale. Waxaad aragtay inay aad u yar tahay ama aanay haba yaraatee sameynin indho-indheyn toos ah iyo inaanay u muuqan inay jeceshahay kalgacal, sida in la taabto ama la isku duubo. Waxaad go'aansatay inaad la hadasho waalidiinta si aad u aragto waxa ay kala kulmayaan guriga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Kormeerka xiriirka ah iyo wada-hadallada qoyska la yeesho ayaa waalidiinta ogeysiin doona goorta ay caawimaad raadsanayaan.

Tixraac ECIPS oo raadi *Qaybta: Korriinka Bulshada iyo Shucuureed* ee Lifaaqa hoose. Ka jawaab su'aalahan soo socda:

- Gaar ahaan, eeg "Qaybta SE1-3: Is-fahamka iyo Ogaanshaha Shucuureed". Waa maxay Hab-dhaqanka aad ka filan karto Hlee da'dan?
- Waa maxay su'aalaha aad weydiin karto waalidiinta?

Lifaaqa Qaybaha ECIPS. Halkan ka raadi "Qaybta SE1-3: Is-fahamka iyo Ogaanshaha Shucuureed" Minnesota Early Childhood Indicators of Progress (ECIPS)

Lifaaqa Tooska ah: https://dcyf.mn.gov/partners-and-providers/child-care-and-early-learning/professional-development/ecips

Shaqada

Shaqada U Dambaysa: Liiska Khayraadka

Hawsha: Shaqada u dambaysa waxay ka turjumaysaa aqoontii lagu bartay kooraskan. Ka qaybgalayaashu waxay abuuri doonaan Liiska Khayraadka ee loogu talagalay carruurta baahiyaha gaarka ah qaba iyo qoysaskooda. Liiskan Khayraadku waa hal waddo oo aan ku caawino carruurta iyo qoysaska inay helaan taageerada ay u baahan yihiin si ay u koraan. Waxaad aqoonsan doontaa oo aad soo ururin doontaa khayraad iyadoo lagu darayo liis si aad ugu wacyigeliso uguna barato. Waxaad u baahan doontaa inaad bilowdo ka shaqeynta shaqada sida ugu dhakhsaha badan si aad waqtigeeda ugu dhammaystirto kooraska.

Liiska Khayraadka waxaa ku jiri doona:

- Ugu yaraan 10 khayraad, iyadoo shan ka mid ah ay yihiin khayraad maxalli ah.
- Qor magaca khayraadka.
- Sharax waxa hay'adda ama adeeggu qabato, goobtooda iyo macluumaadka xiriirka.

- Diiradda saar oo keliya khayraadka qoysaska haysta carruur da'doodu u dhexeyso Dhalasho ilaa 5 sano jir.

Macluumaadka Dhamaystirtka Koorsada

- Liiska Khayraadka waa in loo gudbiyaa tababaraha iyada oo la isticmaalayo iimayl ama waraaq maalinta u dambaysa ee fasalka u dambeeya si loo helo dhibcaha dhammaystirka kooraska ee diiwaanka waxbarashada Develop.
- Tababaraha ayaa xusi doona inaad dhammaystirtay iyo in kale. Wax buundo ah lama bixin doono.
- Shaqadii la soo gudbiyo iyadoo laga dib dhacay lama tixgelin doono.
- Dhererka: Ugu yaraan 300 eray shaqada.

Tusaalooyinka Liiska Khayraadka:

1. Polk County Social Services
   Polk County Social Services waxay bixisaa adeegyo kala duwan oo loogu talagalay carruurta iyo dadka waaweyn ee u baahan caawimaad si ay u sii joogaan guryahooda iyo bulshadooda iyagoo leh heerka ugu sarreeya ee madax-bannaanida suurtagalka ah. Adeegyadan waxaa lagu bixiyaa iyada oo loo marayo barnaamijyo kala duwan oo dhaafitaan iyo kuwa kale kuwaas oo ku kala duwan hadba dadka loo adeego iyo shuruudaha u-qalmitaanka. Polk County Social Services waxaa lagala xiriiri karaa mareegtooda Polk County Social Services ama iyada oo la wacayo 218-281-3127.

2. PACER Center
   PACER Center waxay horumarisaa fursadaha waxbarasho ayna kor u qaaddaa tayada nolosha carruurta iyo dhallinyarada naafada ah iyo qoysaskooda. Waxay bixiyaan tababarka waalidiinta & u-doodidda, xalalka farsamada caawinta iyo barnaamijyada isdhexgalka bulshada. PACER Center waxaa lagala xiriiri karaa adigoo wacaya 1-800-537-2237 ama iimayl u diraya pacer@pacer.org

Fikradaha U Dambeeya ee Kulanka 1-2

- Maxay isdhexgalku muhiim ugu tahay carruurta naafada ah iyo qoysaska?
- Waa maxay waxyaabaha aad haddaba ka samaynayso barnaamijyadaada carruurnimada hore ee taageeraya carruurta naafada ah iyo qoysaska?
- Sideed u dareemaysaa in macluumaadkani ku caawin doono adiga oo ah xirfadle carruurnimada hore?

Ilaha

Istiraatiijiyadaha lagu Taageerayo Xirfadaha Bulshada iyo Shucuureed ee Carruurta Naafada ah

Waxaa jira dhowr istiraatiijiyadood oo xirfadlayaasha carruurnimada hore ay isticmaali karaan si ay u taageeraan korriinka caafimaadka qaba ee carruurta naafada ah. Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka:

Kobcinta Xirfadaha oo Toos ah – Si joogto ah ula samee tillaabooyin fudud ilmaha. U kala jebba hawsha tillaabooyin la maareyn karo ka dibna si joogto ah u xooji. Hannaankan wuxuu u diyaariyaa ilmaha inuu guulaysto.

Tilmaamaha Muuqaalka ah – Isticmaal sawirro, sida kaararka tilmaamaha bulshada, si aad uga caawiso ilmaha fahamka iyo isgaarsiinta. Isku day inaad isticmaasho muraayado ama kaararka sawirada si aad uga caawiso carruurta inay magacaabaan shucuurtaha iyagoo eegaya tilmaamaha wejiga.

Jimicsiga Neefsashada ama Nasashada- Ku hag ilmaha barashada sida loo dejiyo jirkooda. Samee neefsasho qoto dheer ama yoga, akhrinta buug ama isticmaalka rinjiga faraha. Waxaad kaloo bari kartaa ilmaha inuu isku duubo oo muujiyo is-qaddarin.

Sheekooyinka Bulshada – Soo hel sheekooyin ka caawinaya ilmaha inuu barto shucuurtaha waaweyn sida sida saaxiib loo yeesho, loola tacaalo dareenka cadhada, jahawareerka, murugada iyo farxadda. Sheekooyinkani waxay dhiirigelin u noqon karaan carruurta maadaama ay matalayaan tillaabooyinka lagu maareeyo shucuurtaha.

Barashada Dareen-wadaagga iyo Is-weydaarsiga Bulshada– ka caawi ilmaha inuu kordhiyo is-fahamkooda ku saabsan sida kuwa kale dareemayaan adiga oo siinaya eray-bixinno kana hadlaya xaaladaha. Naxariis muuji oo u oggolow ilmaha inuu ku socdo xawligiisa.

Waqti Dheeraad ah oo Hawleed- bixi waqti dheeraad ah oo loogu talagalay hawlaha dhaqdhaqaaqa jidhka – labadaba dhaqdhaqaaqa yar iyo kan weyn - si loo tixgeliyo daalka iyo xaaladaha qaarkood, caqabadaha ogaanshaha jidhka.

Markaad dabaqdo kuwan iyo istiraatiijiyado badan oo kale, waxaad ka caawin doontaa ilmo kasta oo daryeelkaaga ku jira inuu gaaro awooddiisa buuxda.

Istiraatiijiyadaha Ilaalinta ee Lagu Hagayo Hab-dhaqanka – Ciyaarta Loo Dhan Yahay ee loogu talagalay Dhallaanka iyo Carruurta Baradka ah

Xirfadlayaasha carruurnimada hore waxay sameyn karaan isbeddello fudud si barnaamijkooda uga dhigaan mid loo dhan yahay oo u adeega dhammaan carruurta. Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka:

Hadafka Isdhexgalka:	Istiraatiijiyadaha Isdhexgalka:

Abuur Deegaan Loo Dhan Yahay	• Yaree muusigga gadaal ka baxaya si carruurta maqalkoodu culus yahay ay si sahlan ugu raacaan tilmaamaha • Beddel nashqadda qolkaaga si dhammaan carruurtu ay si fudud ugu gaaraan agabka iyo qalabka
Ku Dhaqan Fikirka Hab ku salaysan awoodaha Marka Aad La Macaamilayso Qoysaska	• Ka hadal sida waalidiintu ugu dhiirigelin karaan carruurta inay qaadaan khataro yaryar si ay u dhisaan dareenka awoodda iyo isku-kalsoonida • La shaqee waalidiinta iyo indho-indheyntooda ku salaysan ciyaarta si aad u barato ilmaha si aad uga sii wanaagsan
Qaado Hab Diiradda Saaraya Ilmaha	• U arag ilmaha inuu yahay ilmo marka hore, naafadanimaduna ay tahay marka labaad • La waafaji koritaanka togan ee korriinka waxa aad indho-indheyso inta lagu jiro maalinta
Isticmaal Is-waafajin si Aad u Fududayso Ciyaarta	• Ku hag carruurta adiga oo ka sheekaynaya waxyaabaha wanaagsan ee bulshada dhexdeeda ah oo ay samaynayaan, sida ogaanshaha dhoola cadeynta saaxiib • Abuur kalsooni adiga oo ilmaha si gaar ah ula falgala
Gaaryeelidda Ilmo Kasta oo ay ku jiraan Carruurta qaba Baahiyaha Caafimaadka	• Isticmaal aqoontaada korriinka ilmaha si aad u abuurto waayo-aragnimo taageeraysa korriinka ilmaha • Geli waqti tayo leh Kormeerka carruurta si hawlaha aad doooratay ay faa'iido ugu yeeshaan korriinka ilmaha

Istiraatiijiyadaha Ilaalinta ee Lagu Hagayo Hab-dhaqanka – Ciyaarta Loo Dhan Yahay ee loogu talagalay Dhallaanka iyo Carruurta Baradka ah

Xirfadlayaasha carruurnimada hore waxay sameyn karaan isbeddello fudud si barnaamijkooda uga dhigaan mid loo dhan yahay oo u adeega dhammaan carruurta. Halkaan waxaa ku qoran qaar ka mid ah tusaalooyinka:

Hadafka Isdhexgalka:	Istiraatiijiyadaha Isdhexgalka:
Abuur Deegaan Loo Dhan Yahay	• Yaree muusigga gadaal ka baxaya si carruurta maqalkoodu culus yahay ay si sahlan ugu raacaan tilmaamaha

	• Beddel nashqadda qolkaaga si dhammaan carruurtu ay si fudud ugu gaaraan agabka iyo qalabka
Ku Dhaqan Fikirka Hab ku salaysan awoodaha Marka Aad La Macaamilayso Qoysaska	• Ka hadal sida waalidiintu ugu dhiirigelin karaan carruurta inay qaadaan khataro yaryar si ay u dhisaan dareenka awoodda iyo isku-kalsoonida • La shaqee waalidiinta iyo indho-indheyntooda ku salaysan ciyaarta si aad u barato ilmaha si aad uga sii wanaagsan
Qaado Hab Diiradda Saaraya Ilmaha	• U arag ilmaha inuu yahay ilmo marka hore, naafadanimaduna ay tahay marka labaad • La waafaji koritaanka togan ee korriinka waxa aad indho-indheyso inta lagu jiro maalinta
Isticmaal Is-waafajin si Aad u Fududayso Ciyaarta	• Ku hag carruurta adiga oo ka sheekaynaya waxyaabaha wanaagsan ee bulshada dhexdeeda ah oo ay samaynayaan, sida ogaanshaha dhoola cadeynta saaxiib • Abuur kalsooni adiga oo ilmaha si gaar ah ula falgala
Gaaryeelidda Ilmo Kasta oo ay ku jiraan Carruurta qaba Baahiyaha Caafimaadka	• Isticmaal aqoontaada korriinka ilmaha si aad u abuurto waayo-aragnimo taageeraysa korriinka ilmaha • Geli waqti tayo leh Kormeerka carruurta si hawlaha aad dooratay ay faa'iido ugu yeeshaan korriinka ilmaha

Fahamka Hab-dhaqanka Caadiga ah iyo Goorta La Raadsanayo Caawimaad/Ootiisam

Laga bilaabo dhalashada, carruurtu waxay ku koraan korriinka jidhka, korriinka bulshada iyo shucuureed, korriinka garashada, iyo korriinka luqadda. Doorkeennu haddaan nahay xirfadlayaasha carruurnimada hore waa inaan bixinno fursado aan ku taageerno korriinka ugu wanaagsan ee ilmo kasta dhinac kasta oo ka mid ah meelahan.

In kasta oo carruurta intooda badani ay ku koraan waddo isku mid ah oo ay gaaraan heerarka korriinka, haddana waa inaan sidoo kale ka warqabnaa carruurta aan sidaas ahayn. Marka ilmuhu aanu gaarayn heerarkan, waxay u baahan karaan in la kordhiyo lala socoshada, gudbinta baaritaanka ama qiimeyn dheeraad ah.

Waa muhiim in aad gaartaan [Heerarka Korriinka ee CDC] meel dhow si aad si joogto ah ula socotid una qiimeysid baahiyaha soo ifbaxaya ee carruurta shakhsiga ah. Marka aan ogaano korriinka caadiga ah, waxaan si fiican u diyaargaroweynaa inaan ogaanno astaamaha muujinaya in ilmuhu u baahan yahay taageero dheeraad ah. Qaar ka mid ah talooyinka dheeraadka ah waxaa ka mid ah in ilmaha la kormeero

waqtiyo iyo xaalado kala duwan, in la raadiyo qaababka Hab-dhaqanka, iyo in la ogaado horumarka muddo ka dib. Xasuuso inay jiraan waxyaabo kale oo gacan ka geysan kara hab-dhaqanka ilmaha sida caafimaadka, nafaqada iyo hurdada.

Tusaale ahaan, waxaad arki kartaa astaamahan ilmo baradho ah oo laga yaabo inuu u baahan yahay taageero dheeraad ah:

- Hagid joogto ah ayaa la bixiyaa laakiin dabeecadaha gardarrada ah ayaa sii socda
- Dhibaato xaga saaxiibo yeelashada ah
- Xirfadaha is-caawinta ayaa hoos u dhaca xagga musqusha, hadalka iyo hurdada

Astaamaha kale waxaa ku jiri kara nacayb xagga dareemayaasha ah, indho-indheyn aad u yar ama aan jirin, ilmaha oo aan ka jawaabayn magaciisa, dabeecadaha dhaqdhaqaaqa oo aan caadi ahayn ama qorsheynta dhaqdhaqaaqa iyo muujinta qallafsanaan ama ku dheganaansho hawlo gaar ah.

Khayraad kale oo aad u baahan tahay inaad barato waa Minnesota Early Childhood Indicators of Progress ama ECIPS. Dukumentigan wuxuu kaa sii caawin doonaa fahamka sida carruurta yaryari wax u bartaan. Aan eegno ilmo shakhsi ah oo aan ku tababarano isticmaalka ECIPS.

- Hlee, oo 1 jir ah, ayaa daryeel ku helaysa guri xanaano qoys oo ay la joogaan 2 carruur ah oo kale.
- Tixraac ECIPS oo raadi *Qaybta: Korriinka Bulshada iyo Shucuureed.* Waxaad ka heli doontaa korriinka la filayo oo ku qoran tiir kasta. Waxaad sidoo kale ogaan doontaa inuu jiro korriin isku xiran laga bilaabo Dhalasho ilaa Daryeelka(Kindergarten).
- Gaar ahaan, eeg *Qaybta SE1-3: Is-fahamka iyo Ogaanshaha Shucuureed.* Maxaad ka filan kartaa Hlee da'dan? ECIPS waxay sheegaysaa in Hlee ay tahay inay ogaato sida loo daboolo baahiyahooda oohin, indho-indheyn toos ah iyo/ama inay meel kale eegto, tusaale ahaan. Sidoo kale waa inay taageero ka raadisaa dadka waaweyn ee lagu kalsoon yahay ayna isku daydaa waxyaabo cusub oo tijaabinaya awooddeeda.
- Waxaad aragtay inay aad u yar tahay ama aanay haba yaraatee sameynin indho-indheyn toos ah iyo inaanay u muuqan inay jeceshahay kalgacal, sida in la taabto ama la isku duubo. Waxaad go'aansatay inaad la hadasho waalidiinta si aad u aragto waxa ay kala kulmayaan guriga si aad u hesho macluumaad dheeraad ah. Kormeerka xiriirka ah iyo wada-hadallada qoyska la yeesho ayaa waalidiinta ogeysiin doona goorta ay caawimaad raadsanayaan.

Waxaan ognahay inay jiraan waxyaabo badan oo saameeya sida ilmuhu u koro. Doorkeennu waa inaan isticmaalno Liisaska Hubinta Heerarka Korriinka iyo Minnesota Early Childhood Indicators of Progress si aan si fiican ugu fahamno haddii ilmuhu si caadi ah u korayo.

Fahamka Hab-dhaqanka iyo Saamaynta ay ku leedahay Korriinka/ADHD

Carruurtu waxay Hab-dhaqanka u isticmaalaan waddo ay ku gudbiyaan baahiyahooda. Tani kama duwana carruurta naafada ah kuwaas oo iyaguna is-muujiya si ay u daboolaan baahiyahooda. Si kastaba ha ahaatee, mararka qaarkood Hab-dhaqankan waxaa lagala kulmaa jawaab celin taban. Carruurta

qabta ADHD waxay ku dhibtoon karaan iskuulka, dhibaatooyin kala kulmi karaan cilaaqaadka, waxayna dareemi karaan isku-kalsooni hoose iyo welwel.

Waxaan u baahan nahay inaan kor u qaadno carruurta naafada ah adiga oo fahamna dabeecaddooda kana caawinayna in lagu hago istiraatiijiyado gaar ah. Doorkeennu waa inaan noqono baarayaasha carruurnimada hore ee fuliya saddexda tillaabo ee: Barashada naafonimooyinka kala duwan, fulinta indho-indheyn joogto ah iyo qorsheynta taageerooyinka carruurnimada hore. Saddexdan tillaabo waxay ka caawiyaan ilmaha inuu dareemo inuu meesha ka tirsan yahay oo si buuxda loogu daro barnaamijka carruurnimada hore.

Talaabada 1: Qeexitaannada Noocyada Hoose ee ADHD

Tusaale ahaan, ilmaha qaba Ciladda feejignaan la'aanta/firfircoonida xad-dhaafka ah ama ADHD wuxuu qabaa xanuun raaga, sidaas darteedna wuxuu la kulmi doonaa caqabado joogto ah. Waxaa jira sadex kooxood oo hoose oo ADHD ah:

- Waa midda koowaad waa Inattentive ADHD (ADHD oo aan diiradda la saarin) halkaas oo ilmuhu muujinayo uun feejignaan la'aan.
- Nooca labaad waa Hyperactive/Impulsive ADHD (ADHD dhaqdhaqaaq xad-dhaaf ah/ficil-kadhac). Ilmaha la kulma noocan ayaa noqon doona mid degdeg badan oo dhaqdhaqaaq xad-dhaaf ah leh, laakiin maaha mid aan feejignaan lahayn.
- Ugu dambeyntii, nooca saddexaad ee ADHD waa mid Isku-dhafan waana midda ugu badan. Carruurtan waxay leeyihiin dhammaan saddexda astaamood ee feejignaan la'aanta, dhaqdhaqaaq xad-dhaaf ah iyo ficil-kadhaca.

Talaabada 2: Kormeerka Joogtada ah ee Dabeecadaha ADHD ee Aad Filan Karto

Carruurta qabta Inattentive ADHD waxay ku dhibtoon karaan raacida awaamiirta, waxay u baahan yihiin xusuusinno badan waxayna u muuqdaan kuwo aan wax dhegeysanayn. Nooca labaad, carruurta qabta Hyperactive/Impulsive ADHD ayaa laga yaabaa inay sameeyaan khaladaad badan ama is-dhaqaajiyaan ama aan awoodin inay si deggan u fariistaan. Saddexaad, ilmaha qaba Isku-dhafka ADHD ayaa laga yaabaa inuu muujiyo dabeecado ficil-kadhac ah sida inuu dadka dhexgalo, si degdeg ah u hadlo oo sameeyo waxyaabo aan la ka fiirsan.

Talaabada 3: Taageerooyinka Carruurnimada Hore ee loogu talagalay carruurta qabta ADHD:

Carruurta qabta ADHD waxay ka jawaabaan dhaqamo badan oo carruurnimada hore ee caadiga ah. Tusaale ahaan, samaynta iyo dhejinta Jadwalka Maalinlaha ah waxay bixisaa nidaamka ay carruur badan oo qabta ADHD u baahan yihiin. Hubi inaad ku darto sawirro si aad uga caawiso carruurta fahamka waxa ku xiga maalintooda. Istiraatiijiyad kale waa in diiradda la saaro in ilmaha la baro hal shay markiiba. Tani waxay caawin doontaa ilmaha qaba ADHD ee dhibaato ku qaba xusuusta ama abaabulka waxyaabaha. Ugu dambeyntii, isticmaal liisaska hubinta ama shaxda abaalmarinta si aad u caawiso carruurta laga yaabo inay lumiyaan dhiirigelinta si ay u helaan xirfado cusub. Khibradahan guusha ah ayaa wax ku biirin doona isku-kalsoonida caafimaadka qabta ee ilmaha.

Guudmarka Kulanka 3-4

Qaab-dhismeedka Aqoonta iyo Kartida (Knowledge and Competency Framework, KCF) ee Minnesota ee qeybaha Mowduuca Xirfadlayaasha Dhallaanka, Aagga Maadada Isku Xirka Horumarinta Carruurta (Child Development Associate, CDA)

Knowledge and Competency Framework for Early Childhood Professionals ee Minnesota iyo Qaybaha Maadada Child Development Associate (CDA) ayaa halkan lagu taxay si ay uga caawiyaan ka-qaybgalayaasha inay fahmaan xirfadaha, macluumaadka, iyo qaybaha maadada ee tababarku ka hadlayo.

- Aagga Mawduuca KCF: IV. Baaritaan, Qiimeyn iyo Gaaryeelid
- Aagga Maadada CDA: VIII. Mabaadii'da korriinka iyo waxbarashada carruurta

Sharaxaada Kooraska

Xaaladaha naafonimada kala duwan iyo baahiyaha gaarka ah ayaa sii kordhaya waxaana bixiyeyaasha daryeelkacarruurta intooda badan ay heli doonaan fursad ay ku daryeelaan carruurta baahiyaha gaarka ah qaba. Kooraskani wuxuu eegi doonaa qaar ka mid ah astaamaha muujinaya welwelka korriinka oo ay ku jiraan dabeecadaha adag iyo qaar ka mid ah cudur-sheegista ugu badan ee la arko. Koorasku wuxuu sidoo kale dib u eegi doonaa nidaamka gudbinta ee baaritaanka iyo khayraadka wax-qabadka hore (EI).

Ujeedooyinka Waxbarashada

Inta tababarkan socdo, ka qaybgalayaashu waxay:

4. Aqoonsan doona baahiyaha gaarka ah iyo baahiyaha caafimaad ee gaarka ah ee ugu badan iyo saamaynta ay ku leeyihiin korriinka.
5. Aqoonsan doonaa goorta iyo halka loo gudbiyo si loogu sameeyo baaritaan iyo/ama qiimeyn.
6. Qori doonaan khayraadka iyo adeegyada loogu talagalay carruurta baahiyaha gaarka ah qaba oo ay ku jiraan shuruudaha u-qalmitaanka iyo sida loo taageero qoysaska inay helaan adeegyadan.

Dulmarka Kulanka 3aad

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Ujeedada Waxbarashada oo la gaaray
A	45 daqiiqo	Soodhaweyn iyo Dib u eegis	Koox Yar Dood/Dib u eegis	1-3

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Ujeedada Waxbarashada oo la gaaray
B	45 daqiiqo	Aqoonsan doona baahiyaha gaarka ah iyo baahiyaha caafimaad ee gaarka ah ee ugu badan iyo saamaynta ay ku leeyihiin korriinka	Dooda Kooxda Ballaaran	4
C	30 daqiiqo	Sharax sida loo sameeyo deegaan loo dhan yahay oo ku habboon dareemayaasha	Lammaanin iyo Wax wadaagis Dooda Kooxda Ballaaran	4
	Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood			

Dulmarka Kulanka 3aad

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Waxbarasho Ujeeddooyinka
A	30 daqiiqo	Aqoonsan doonaa goorta iyo halka loo gudbiyo si loogu sameeyo baaritaan iyo/ama qiimeyn	Hawsha Koox Yar Dooda Kooxda Ballaaran Muuqaalka	2

Qaybta	Waqtiga Qaybta	Fikradaha Muhiimka Ah	Xeeladaha Waxbarida	Waxbarasho Ujeeddooyinka
B	30 daqiiqo	Sharax sida loola shaqeeyo waalidiinta iyo sida loo caawiyo carruurta si ay u dareemaan inay ka mid yihiin	Lammaanin iyo Wax wadaagis Dooda Kooxda Ballaaran Muuqaalka Milicsiga shakhsi ahaaneed	2
C	30 daqiiqo	Qori doonaan khayraadka iyo adeegyada loogu talagalay carruurta baahiyaha gaarka ah qaba oo ay ku jiraan shuruudaha u-qalmitaanka iyo sida loo taageero qoysaska inay helaan khayraadkan	Dooda Kooxda Ballaaran Shaqada U Dambaysa	3
D	15 daqiiqo	Sharax sida looga hortago xadgudubka loo geysto carruurta baahiyaha gaarka ah qaba 5-ta Arrimood ee Ilaalinta	Lammaanin iyo Wax wadaagis Dooda Kooxda Ballaaran Milicsiga shakhsi ahaaneed	3
E	15 daqiiqo	Dib u Eegista/Xidhitaanka Ujeeddooyinka		
	Wadarta Guud ee Wakhtiga: 2 saacadood			

Mawduucyada la muujinayo

Eray-bixinta, Baahiyaha Gaarka ah, Deegaan Loo Dhan Yahay oo Ku habboon dareemayaasha, Baaritaanka, Waalidiinta oo ah Saaxiibo, Ka hortagga Xadgudubka, Khayraadka.

Dhaqan-gelinta Dhabta ah

Liiska Eray-bixinta

Hordhaca Caruurta Baahiyaha Gaarka ah qaba

Americans with Disabilities Act (ADA) - ADA waxay keentay in carruurta naafada ah ay helaan waxbarasho iyo adeegyo la xiriira helitaanka waxbarashada.

Neef (Asthma) - Neeftu waa xaalad ay dhuumaha hawada ee sambabada cidhiidhi noqdaan ama si buuxda u xirmaan. Marka ay dhuumaha hawadu xirmaan, waxay u baahan tahay dadaal dheeraad ah si hawada loogu qasbo inay marto si ay neefsashadu u adkaato.

